

## BAYAANKA MACLUUMAADKA TALLAALKA

# Tallaalka Hib

## Waxaad u Baahan Tahay Inaad Ogaato

(*Haemophilus influenzae* nooca b)

Bayaanno Macluumaad Tallaal oo farabadan ayaa lagu heli karaa luqadaha Isbaanishka iyo luqado kaleba. Eeg [www.immunize.org/vis](http://www.immunize.org/vis)

Hojas de información sobre vacunas están disponibles en español y en muchos otros idiomas. Visite [www.immunize.org/vis](http://www.immunize.org/vis)

### 1 Waa maxay sababta la isu tallaalayo?

*Haemophilus influenzae* nooca b (Hib) waa cudur daran oo ay keento bakteeriyadu. Caadi ahaan wuxuu ku dhacaa carruurta ka yar 5ta sano.

Ilmahaagu wuxuu qaadi karaa cudurka Hib ag joogidda carruurta kale ama dadka waaweyn ee qaba bakteeriyada ee aan oagayn inay qabaan. Jeermigu wuxuu ku faafaa qof ka qof. Haddii jeermigu uu ku hakado sanko iyo cunaha ilmaha, waxay u badan tahay inuuna ilmuhu jirran. Laakiin mararka qaarkood jeermigu wuxuu ku faafaa sambabbada ama qulqulka dhiigga, oo markaas cudurka Hib wuxuu sababi karaa dhibaatooyin daran.

Intii ka horreysay tallaalka Hib, cudurka Hib wuxuu ahaa sababta ugu horreysa ee u horseedda bakteeriyada qoorgooyaha carruurta ka yar 5 sano ee ku nool Maraykanka. Qoorgooyuhu waa infakshan ku dhaca xuubka maskaxda daboolo iyo xangulada lafdhabartaba. Waxay keeni kartaa dhaawac maskax iyo dhego-beel. Cudurka hib ayaa waliba u horseedi kara:

- oofwareen (kolba-aariyo)
- dhuunta oo u bararta si daran, oo laga neefsan kari waayo
- caabuqa dhiigga, xubnaha, lafaha, iyo dheeha wadnaha
- dhimasho

Kahor ka tallaalka Hib, illaa 20,000 oo carruur oo ka yar da'da 5 sano ayaa Waddanka Maraykanka qaadi jiray cudurka Hib oo nafta halis galin jiray sannad kasta, qiyaastii illaa 3% – 6% ayaa dhiman jirtay.

**Tallaalka Hib** ayaa ka hortagi kara cudurka Hib. Illaa intii la bilaabay tallaalka Hib, tirada xaaladaha baahsan ee cudurka Hib ayaa yaraaday illaa in ka badan 99%. Carruur aad u badan ayaa qaadi lahaa haddaan joojino tallaalka.

### 2 Tallaalka Hib

Waxa jira dhowr noocyo tallaalka Hib oo kala duwan. Ilmahaaga ayaa qaadan doona 3 ama 4 qiyaasta dawada ah, iyadoo ay ku xiran tahay hadba tallaalka la isticmaalo.

Qiyaaso tallaalka rotavirus ayaa lagu talinayaa da'ahaan:

- Qiyaasta Dawada Kowaad: 2 bilood jiritaan
- Qiyaasta Labaad: 4 bilood jiritaan
- Qiyaasta saddexaad: 6 bilood jiritaan (haddii loo baahdo, iyada oo ku xidhan nooca tallaalka)
- Qiyaasta Ugu Dambaysa: 12–15 bilood jiritaan

Tallaalka Hib waxa loo siin karaa si badbaado leh wakhti la mid ah marka la siinayo tallaallada kale.

Tallaalka Hib waxa lagu siin karaa qayb ahaan iyada oo iskujir ah. Tallaallada iskujirka ah ayaa laga sameeya laba ama in ka badan oo ah noocyo tallaal oo la iskudaray iyada oo ah hal irbad, markaa halkaa tallaal ayaa ka hortagi kara in ka badan hal cudur. Waxaad macluumaad dheeraad ah weyddiisaa dhakhtarkaaga.

Dadka ka wayn da'da 5ta sano caadi ahaan uma baahna tallaalka Hib. Laakiin waxa laga yaabaa in la siiyo carruurta waaweyn ama dadka qaangaadhka ah kahor qalliinka marka laga saarayo beeryarada ama waxa ka dambeeya ku tallaal dhuux laf. Waxa kale oo waliba la siin karaa qof kasta oo qaba xaaladaha caafimaad qaarkood sida cudurka unug majada (sickle cell) ama HIV/AIDS. Faahfaahinteeda weyddiso dhakhtarkaaga.

### 3 Dadka qaarkood ma aha inay qaataan tallaalkan

Tallaalka Hib waa in aan la siin dhallaanka ka yar da'da 6 toddobaad.

U sheeg dhaqtarkaaga:

- **U sheeg hadduu bukaanku leeyahay wax kasta oo alerji (nolasha halis galineysa) ah.** Haddii u bukaanku waligii ku yeeshay dareen-celin alerji oo nolosha halis galisay, kaddib markii u qaatay qiyaas taallaal Hib, ama alerji daran u ku yeeshay qayb kasta oo ka mid ah tallaalkan, waa inuuna isagu ama iyadu qaadan qiyaasta tallaalka.
- **Haddii uuna bukaanku si fiican dareemaynin.** Dhakhtarkaaga ayaa kugula talin kara inaad sugto illaa bukaanku si fiican dareemayo. Laakiin waa inaad ku soo noqotaa.

## 4 Halista dareen-celinta tallaalka

Tallaalka, sida dawo kastaba, waxa dhici karta inay jiraan saamayn soo raaca. Kuwaas ayaa badiyaa ah kuwo sahlan ama iyaga ayaa iskood isaga taga.

Dareen-celinta darani inay dhacdana waliba waa suuratagal, laakiin waa naadir.

Dadka qaata tallaalka Hib badankoodu wax dhib ah kalama kulmaan.

**Dhibaatooyinka fudud** ee soo raaca marka tallaalka Hib la qaato:

- guduudasho, diirimaad, ama meesha tallaalka oo bararta
- qandho

Dhibaatooyinkani ma badna. Hadday dhacaan, caadi ahaan waxay billaabmaan isla markaaba tallaalka kaddib waxayna socdaan 2 ama 3 maalmood.

**Dhibaatooyinka dhici kara kaddib tallaalka kasta:**

- Miyir beel kooban ayaa dhici karta kaddib hawlqabad kasta oo caafimaad, kuna jiro tallaalku. Fadhiga ama jiifsadka illaa 15 daqiiqo kaddib tallaalka ayaa ka caawin qofka kahortagga miyir-beelka iyo dhaawacyada ay keento dhicistu. U sheeg dhakhtarkaaga haddii bukaanku u muuqato inuu dareemayo dawakhaad, ama araggiisu isbeddelo ama dhaguhu guuxaan.
- Xanuun garabka ah oo daran iyo yaraanta baaxadda dhaqdhaqa gacanta tallaalka laga siiyay ayaa dhici karta, iyada oo aad dhif u ah, kaddib tallaalka.
- Dareen-celinta alerjiga daran ee ka yimaad tallaalka ayaa aad dhif u ah, iyada oo lagu qiyaaso inay ka yar tahay 1 milyankii tallaallo. Hadday dhacdaba, badiyaa waa gudaheeda dhowr daqiiqado illaa dhowr sacaadoood kaddib qaadashada tallaalka.

Waxa marwalba kormeer lagu hayaa badbaadada tallaallada. Macluumaad intaas dhaafsiisan, booqo [www.cdc.gov/vaccinesafety/](http://www.cdc.gov/vaccinesafety/)

Si ay bixiyeyaasha daryeel caafimaad u helaan xaaladda saxda ah ee warka talaalka, qiimeynta warka, iyo jadwalka/kaltanka loogu taliyay talaalada mustaqbalka, waxa warka loo diri doonaa Michigan Care Improvement Registry (Diiwaanka Hagaajinta Daryeelka Michigan). Shakhsiyaadku ama dadku waxa ay xaq u leeyihiin in ay bixiyahooda daryeelka caafimaad ka codsadaan in aanuu Diiwanku u gudbin warka.

DCH-0449SO

AUTH: P.H.S., Act 42, Sect. 2126.

## 5 Maxaa dhacaya haddii ay waxyeello ka yimaaddiin?

**Maxaa ila habboon inaan u fiirsado?**

- U fiirso wixii kasta ee adiga kaa wewelsiiya, sida calaamadaha fal-celinta xasaasiyadda daran, qandhada aad u sarreysa, dabeecadda isbeddelaysa. Calaamadaha ficil-celinta xajiinta/ alerjiyada daran waxaa ka mid ah xasaasiyad jidhka ah, waji iyo cune barar, neefta oo ku qabata, wadnaha oo degdeg kuu garaaca, dawakhaad, iyo tabcaanimo. Taasi waxay bilaabantaa sida caadiga ah dhowr daqiiqo illaa dhowr saacadood kaddib tallaalka.

**Maxaan sameeyaa?**

- Haddii aad u maleyso inay tahay ficil-celin alerji daran ama xaalad kale oo degdeg ah oo aan la sugin karin u wac 9-1-1 ama qofka gee isbitaalka kuugu dhow. Haddii kale, u wac dhakhtarkaaga.
- Markaa waxa ka dambeeya, - ficil-celinta waa in warxixin laga siiyaa Ka Warbixinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (Vaccine Adverse Event Reporting System, VAERS). Dhakhtarkaaga ayaa xerayn kara warbixintan, ama adiga laftaada ayaa sidaas samayn kara adiga oo u mara websaytka VAERS ee ku taal [www.vaers.hhs.gov](http://www.vaers.hhs.gov), ama adiga oo waca **1-800-822-7967**.

*VAERS waxa kaliya ee loogu talagalay in looga warbixiyo falcelinta. Iyagu ma bixiyaan talo caafimaad.*

## 6 Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (National Vaccine Injury Compensation Program)

Barnaamijka Magdhawga Dhaawaca Tallaalka Qaranka (VICP) waa barnaamij federaal loo abuuray magdhowga dadka laga yaabo ay wax yeelleeyeen tallaallada qaarkood. Dadka rumaysan inuu tallaalka dhaawacay waxay wax ka ogaan karaan barnaamijka iyo sida loo xereysanayo cabasho iyagoo waca **1-800-338-2382** ama booqda websaydka VICP ee [www.hrsa.gov/vaccinecompensation](http://www.hrsa.gov/vaccinecompensation).

## 7 Sidee baan macluumaad intaas dhaafsiisan ku ogaan karaa?

- Weyddii dhakhtarkaaga. 1-888-767-4687
- Wac waaxda caafimaadka deegaankaaga ama gobolkaaga.
- La xiriiir Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (Centers for Disease Control and Prevention, CDC):
  - U wac **1-800-232-4636 (1-800-CDC-INFO)**
  - Booqo websaydtki CDC ee ku taal [www.cdc.gov/vaccines](http://www.cdc.gov/vaccines)

Vaccine Information Statement (Interim)  
**Hib Vaccine**

2/04/2014

Somali

42 U.S.C. § 300aa-26

Translation provided by the Immunization Action Coalition

Office Use Only

